



Macluumaad ku sabsan Trafikkalendern

Trafikkalendern waxa weeye qalabka waxbaridda carruurta iyo gaadiidka ee Swiidhan ugu weyn. Qalabku waxa uu taageero siiyaa dugsiyada iyadoo arimaha gaadiidka uu ku dhex dhafo maadooyinka kala duduwan. Ammaanka gadiidka, arrimaha caafimaadka iyo deegaanka ayaa ah waxyaalaha mawduucyada ka dhex muuqda qalabka oo dhan.

Bil kasta waxa la qabtaa waxqabad halkaas oo ay ardeydu iyo dugsiyadu ay ku helayaan fursad ay kaga qeyb qaadanayaan oo ay ugu guulaysanayaan jaa'iisado. Hadafku waxa weeye in waxbarashada gaadiidku ay ahaato mid xiiso iyo soo jiidasho leh oo dhiirgalin keenta.

In ka badan 500 000 oo ardey iyo qiyaastii 30 000 oo macalin oo sanad dugsiyeedka F-6 digata ayaa lacag la'aan heli doona qalabka kala duduwan ee Trafikkalendern. Qalabka waxa lagu heli karaa iyadoo daabacan iyo iyadoo bogga internetka ku jirta.

Qiyaas ahaan 3000 oo shirkado iyo ururuada degaanka ee kale ah ayaa ku lug leh sidii loo suurto galin lahaa in qalabka lacag la'aan la qeybiyo. Sidoo kale waxay ka qeyb qaadanayaan in la faafiyo macluumaadka ku saabsan carruurta u nugul gaadiidka.